



SAMBABKA LO'DA

Afka Ingriisiga waxaa lagu yiraahdaa 'Contagious Bovine Pleuro-pneumonia (CBPP)

Cudurka **Sambabka Lo'da** waxaa keena nooc ka mid ah **Bakteeriyada** kuwa loo yaqaan **Mycoplasma**. Wuxuu ka dhacaa meelo badan oo adduunka ah oo ay ka mid yihiin badiba qaaradda Afrika daafaheeda kala duwan oo ay ku jiraan dhulka Soomaalidu degto.

Sambabka Lo'du wuxuu ku dhacaa lo'da la dhaqdo iyo duurjoogta la yiraahdo Lo'a Gisida.

Gudbinta iyo Saamaynta Cudurka

Habka ugu muhiimsan ee xooluhu isugu gudbiyaan cudurkani waa kan **tooska** ah ; markii neefka buka neeftiisa ama dheecaamadiisa mid ka mid ah ay gaadhaan neefka fayow ama caafimaadka qaba cudurkeenihiina u gudbo.

Waxaa jirta oo kale in qaar ka mid ah neefkii ka bogsoodey cudurkani ay noqdaan kuwo sida ama xambaarsan cudurkeenihiin muddo dheer, marka dambena u gudbin karaan jeermigaas xoolo caafimaad qaba. Sida ay arrintani ku dhacdaa ama u suurta gashaana waa sidan : markii neefku ka soo bogsoonayo cudurka ayaa sambabadiisa nabaradii ku yaal ee cudurku keenay waxaa isku wareejiya xuub ama wax sidii qolof oo kale ah taas oo jeermigii cudurka keenayey ku xayirta ama ku xanibta goobtaas. Waxaa dhacda in muddo ka dib (12 bilood iyo ka badanba) xuubkii ku dahaadnaa nabarkii dilaaco cudurkeenihiina banaanka u soo baxo isaga oo soo raacaya neefta ama dheecamada ka yimaada qaybaha neefsiga neefka (duufka, qufaca iwm).

Xoolaha noocaas ah oo loo yaqaan **cudur sidaha** ayaa u sabab ah in cudurkani soo noq-noqdo

Inkastoo cudurkan Sambabku uusan sida cudurada qaarkood de-deg u fidin, dhimashadaa uu sababaana aanay aad u badnayn, hadana wuxuu ka mid yahay kuwa ugu muhiimsan ee xoolaha wuxuuna keeni karaa dhibaato dhaqaale oo ka timaada ; dheefta xoolaha oo lunta (cad iyo caano), dhimashada, dhicis, kharshka daaweynta iyo talaalka, iyo ganacsiga xoolaha oo uu aad u saameeyo.

Astaamaha / Calaamadaha Cudurka

Cudurka Sambabku wuxuu ku dhacaa oo saameeyaa qaybaha ama xubnaha neefka u qaabilsan neefsiga oo ay ugu horeeyaan sambabadu. Astaamaha lagu arko neefka cudurkani ku dhaco waxaa ka mid ah :

- Dhogor madoobad ama gan-gan ku jabsan neefka (cadar)
- Daaqa oo uu yareeyo
- Irmaanka oo caano yareeya
- Xumad ama qandho sare
- Rimayda oo dhicisa
- Qufac (engegan marka hore, marka dambese leh dheecaan)
- Neefsiga oo adkaada oo tiradiisuna korodho (inta jeer ee neefku neefsanayo daqiiqaddii)
- Taah iyo hiinraag
- Neefku wuxuu u jeestaa dhanka dabayshu ka soo dhacayso isagoo afka kala haya (fiiri sawirka)
- Labada adin (jeeni) ee hore oo uu neefku kala fogeeyo markuu taaganyahay.



Neef lo' ah oo qaba Sambab(courtesy Centre for Food Security & Public Health)

Markii la qalo neefka isbeddelka lagu arku waxaa ka mid ah :

- Guud ahaan neefku waa caato ama weyd
- Sambabada oo bararan midabkuna isbeddeley
- Dheecan sida malax ama abur ka buuxa ama lagu arko dhuumaha neefta
- Saableyda oo dheecaan ka buuxo
- Derbiyada kala qaybiyaha qolalka sambabada oo bararan
- Goobo ka mid ah sambabada oo buka oo xuub isku dahaadhay ama isku daboolay
- Qaybo sambabada ka mid ah oo feedhaha ku dhegan.

Waxaa kale oo isbeddel lagu arki karaa xubno kale oo aan ahayn kuwa neefsiga sida ; wadnaha iyo kelyaha.

Isbeddelada lagu arki karo neefka hilbihiisa markii la qalo waxay ku xidhan yihiin hadba heerka cudurku joogey ama mudada neefku bukey.



Dheecaan ka buuxa saableyda neef u dhintay Sambab (Centre for Food Security & Public Health)

Daaweynta iyo ka hortagga

Maadama keenaha cudurkani yahay **Bakteeriyada** neefka buka waxaa lagu daaweyn karaa daawooyinka loo yaqaan **Antibiotiga** Soomaali badanina u taqaan **OKSta** sida *Oxytetracycline* iyo *Tylosin*. Waxaa muhiim ah in la xusuusnaado in neefkii la daweeey bogsoon karo lakiin u hadana noqon karo mid sida ama mid ay sambabadiisa ku sugan yihiin jeermigii cudurka keenay oo xoolaha kale khatar ku noqon kara mustaqbalka.

Si loo xakameeyo ama looga hortago Sambabka Lo'da waxaa loo baahan yahay in la fuliyo talaabooyinka soo socda markii cudurkani dilaaco :

- Maamulka iyo dhakhaatiirta xoolaha oo la wargelyo
- Isu socodka xoolaha oo la xayiro ama si cilmiyaysan loo maamulo
- Xoolaha buka oo laga sooco inta kale lagana ilaaliyo
- Ganacsiga lo'da oo la hakiyo
- Talaal lo'da la talaalo , **marka hore laba jeer sannadkii inta ka dambeysana sannadkii hal (1) mar**